# Daryeelka Bulshada

Nidaamka Ceymiska Bulshada
Lacagaha marka la gaboobo
Dhaqaalaha Cuuryaamiinta
Shaqo la'aanta
Xanuunada iyo Shilalka
Waalidiinta iyo Qoyska
Ceyrta

# Nidaamka Ceymiska Bulshada

Dadka ku dhaqan Swiserlaan waxay ku jiraan Ceymiska Bulshada oo ka ilaalinayo khataro kala duwan. Tusaale ahaan Ceymiska wuxuu caawiyaa marka qof waayo shaqadiisi ama xanuunsado. Sidoo kale waxay caawiyaan Qoysaska iyo dadka da'da ah.

## Mabaadi'da Ceymiska

Ceymiska Bulshada waxa maalgeliyo dadka ku dhaqan wadanka Swiserlaan. Hanaanka Isxilqaanka ku saleysan ayaa ah: Dadka intooda badan aya dhiibayo lacagta halka dadka ama kooxo gaar ah ay helayaan caawinaada. Ceymiska Bulshada inta badan waa waajib. Lacagaha ceymiskan waxaa si toos ah looga jaraa mushaharadka shaqaalaha. Sidoo kale dhammaan dadka loo shaqeeyo, ganacsatada iyo dadka aan shaqeynin way bixiyaan lacagahan.

## Adeegyada

Ceymiska Bulshada waxuu caawiyaa dadka ay haystaan duruufo cayiman. Waxay bixiyaan gunooyin, lacagaha dadka xanuunsan ama da'da ah, lacagaha ilmaha ama waxay bixiyaan sidoo kale qarashaadka xanuunada ama shilalka ku baxo. Dhammaan Ceymiska Bulshada waxaa lagu dhaqaa xeerarka dowliga ah.

## Goorma ayaa la is caawiyaa?

- Da'da, Geerida iyo Cuuryaanimada (3-da Tiir: Ceysmiska Dadka da'da ah iyo Kuwa laga dhintay/Ceymiska Cuuryaaminta, Keydka da'da ee Shaqaalaha, Keydka da'da ee gaarka ah)
- Marka Qof xanuunsado ama shil galo (Xanuunada iyo Shilalka)
- Hooyada markaa dhashay (Caawinta Hooyada)
- Shaqo la'aanta (Ceymiska Shaqo la'aanta)
- Qofka caruur haysto (Taakulaynta Qoyska)

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/soziale-sicherheit/sozialversicherungssystem

# Lacagaha marka la gaboobo

Lacagaha marka la duqoobo waxa loogu tala galay in dadka howlgabka ah dhaqaale kufilan oo ay ku noolaadan usoo haro. Nidaamka lacagahan ee Swiserlaan ayaa ku taagan 3 tiir. Ceymiska da'da iyo dadka laga dhintay (AHV), Lacagaha dadka shaqeeyo laga uriiriyo si loosiiyo marka ay gaboobaan (Pensionkasse) iyo lacaga marka la duqoobo dadka si xor ah meel u dhigtaan (3.Säule).

## Ceymiska Da'da iyo dadka laga dhintay (Tiirka 1-aad, 1.Säule)

Ceymiska da'da iyo dadka laga dhintay (AHV) waa mid dowli ah. Dadka qaangaarka ah badidood waa inay shubaan lacagahan. Lacagahan waxaa laga jaraa si toos ah mushaharaadka dadka shaqeeyo, kuwa loo shaqeeyana waxay bixiyaan nus kamid ah lacagahan. Dadka iskood u shaqeysta sida ganacsatada ama dadka aanan shaqeyn waa inay weydiiyaan hay'ada ururiso dhaqalahan (Ausgleichskasse) sidii ay ku bixin lahaayeen. Ceymiskan waxuu siiyaa bil walbo dadka howlgabka ah dhaqalaha gaboowga. Inta lacag ay horey usoo shubeen waqtigii ay shaqayn jireen ayay ku xirantahay dhaqalaha bil walbo lasiiyo. Ceymiskan sidoo kale waxuu caawiyaa agoomada iyo carmalka. Dhammaan dadka degan Swiserlaan waxay helayaan Kaarka Ceymiska iyo lambarkiisa Ceymiska bulshada ee u gaarka ah.

## Sanduuqa howlgabka (Tiirka 2-aad, 2. Säule)

Ceymiska da'da iyo dadka laga dhintay kaliya kuma filna inta badan in marka howlgabka la noqdo lagu noolaado nolol sidii hore ah. Sidaas darteed ayaa dadka shaqeeyo waxay leeyihiin sanduuq wax loogu uruuriyo (Pensionskasse) kaasoo waajib ku ah dadka ay soo galaan sanadkiiba mushaharo cayiman. Dhaqalahan waxa bil waliba si toos ah looga jaraa dadka shaqeeyo mushaharkooda midka loo shaqeeyana waxa waajib ah inuu nus kamid ah bixiyo. Dadka iskufilan lagama doonayo inay wax ku shubaan sanduuqan. Hadii ay jeclaadaana wax bixin karaan si aan qasab ahayn iyaga ayaana go'aansan karo. Sanduuqan qof walba inta ugu keydsan waxaa lasiin karaa marka uu gaboobo bilwalba ama hal mar ayaa loo wada shubi karaa. Xaaladaha qaarna waxaa dhacdo in waqtigii howlgabka kahor loo shubo lacagtaan qofkii ay u keydsaneyd: Tusaale ahaan marka qof uu ganacsi furanayo, uu ka guurayo Swiserlaan oo dhan, uu dhisanayo guri ama uu iibsanayo guri.

## Sanduuqa iskaa wax ugu shubo (Tiirka 3-aad, 3. Säule)

Tiirkan 3-aad waa mid qof walba si xur ah uu goonidiisa ugu kaydsan karo lacagahii uu heli lahaa marka uu da' noqdo. Abaal marin waxuu u helaa qofka Tiirkan 3-aad ku kaydsado in wax laga dhimo Canshuuraha. Waxaa laga sameysan karaa Sanduuqan Bangiyada ama Shirkadaha Ceymiska bixiya. Waxaa lagu taliyaa in qofku kaydka tiirka 3-aad sameysto si uu markuu gaboobo u haysto haraa lacageed oo dheeri ah.

## Dhaqaalaha dheeriga ah

Dadka da'da ah ee marka laga soo tago Ceymiska da'da iyo Lacagaha Sanduuqa Gabowga aana haysan dhaqaale ku filan oo ay ku nooladaan waxaa jiro dhaqaale dheeri ah oo shuruudo ku xiran oo lagu kabayo lacagaha soo galo (Ergänzungsleistungen). Lacagahan waa inay ka codsadaan Hay'adda Dhaqalaha Bulshada. Waxay u dhigantahay si cad qofka xaqqa u leh qaadashada dhaqaalahan. Dhaqalaha dheeriga ah waxaa maalgeliyo dadka canshuuraha bixiyo.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/soziale-sicherheit/altersvorsorge

# Dhaqaalaha Cuuryaamiinta

Qofka xanuun dartiis muddo dheer qayb ama si buuxdo u shaqeyn karin waxuu shuruudo kadib xaq u yeelanayaa kaalmo dhaqaale oo uu ka helayo Ceymiska Cuuryaaminta (IV). Ceymiskan ma bixiyo lacag kaliya. Waxuu inta badan sidoo kale ka caawiyaa dadka ku jiro, sidii ay u gali lahaayeen amaba dib ugu laaban lahaayeen suuqa shaqada.

## Ceymiska Cuuryaminta

Ceymiska Cuuryaanka (IV) waa mid dowli ah. Dadka qaangaarka ah badidood waa inay shubaan lacagahan. Lacagahan waxaa laga jaraa si toos ah mushaharaadka dadka shaqeeyo, kuwa loo shaqeeyana waxay bixiyaan nus kamid ah lacagahan. Dadka iskood u shaqeysta sida ganacsatada ama dadka aanan shaqeyn waa inay weydiiyaan hay'ada ururiso dhaqalahan (Ausgleichskasse) sidii ay ku bixin lahaayeen.

## Caawinaada laga helo Ceymiska Curyaaminta

Waxa xaq u leh Ceymiskaan dadka ugu yaraan hal sano caafimaad darro awgeed (Maskax ahaan ama Jir ahaan) qayb ama si buuxdo u shaqeyn kari waayay. Ceymiskan waxuu bilwalbo u bixiyaa dhaqaalaha caawinta qaab gunno ah. Laakin waa marka qofka ku jiro caymiska xanuunada haayo darteed uu dib ugu laaban karin suuqa shaqada. Ceymiskan waxuu caawiyaa dadka cuuryaaminta ah si ay u helaan shaqo u qalanto oo ay kabixi karaan. Caawinada laga helo ceymiskan waa in laga codsadaa hay'adda ururiso dhaqalahan (Ausgleichskasse).

## Dhaqaalaha dheeriga ah

Dadka marka laga soo tago dhaqaalaha kasoo gala Ceymiska Cuuryaaminta aanan haysan dhaqaale ku filan oo ay ku nooladaan waxaa jiro dhaqaale dheeri ah oo shuruudo ku xiran oo lagu kabayo lacagaha soo galo (Ergänzungsleistungen). Lacagahan waa inay ka codsadaan Hay'adda Dhaqalaha Bulshada. Waxay u dhigantahay si cad qofka xaqqa u leh qaadashada dhaqaalahan. Dhaqalaha dheeriga ah waxaa maalgeliyo dadka canshuuraha bixiyo.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/soziale-sicherheit/invaliditaet

# Shaqo la'aanta

Dhammaan Shaqaalaha waxay ku jiraan Ceymiska Shaqo la'aanta. Qofka shaqo la'aan noqdo caadiyan waxuu helayaa in muddo cayiman ah kaalmo dhaqaale. Dadka shaqo la'aanta ah waa inay iska diiwaangeliyaan Xarumaha Gobolka ee Shaqada (RAV). Halkaas waxay ka helayaan caawinta shaqo raadinta.

## Ceymiska Shaqo la'aanta

Ceymiska Shaqo la'aanta (ALV) waa hay'ad dowli ah oo qasab ku ah dhammaan shaqaalaha inay ku jiraan. Lacagaha Ceymiskan waxaa bil walbo laga toos looga jaraa mushaharka shaqaalaha. Qofka loo shaqeynayo waxuu dhiibaa haaf kamid ah lacagahaas. Dadka goonidooda u shaqeysto magali karaan Ceymiskan. Qofkii shaqo la'aan ku dhacdo, waxuu ka helayaa sanduuqa shaqo la'aanta, kaalmo ah badalkii mushaharkii uu ku shaqeyn jiray (Arbeitslosengeld). Inaad helayso ama Goorta ay kuu bilaabanayso iyo Cadadka Kaalmada shaqo la'aanta (Abeitslosengeld) ee lagu siin doono waxay ku xirantahay wax yaabo kala duwan. Tusaale ahaan, intii sano ee aad horay usoo shaqeysay ama sababta aad u noqotay shaqo la'aanta.

## Qaabka loo wajaho Shaqo la'aanta

Maalin kahor inta aadan shaqada kasoo tagin ama ugu dambeyn maalinta koowaad ee shaqo la'aanta kugu dhacdo waxaad ku qasban tahay inaad iska diiwaangeliso Xafiiska Shaqada ee Gobolka (Regionales Arbeitsvermittlungszentrum, RAV). Halkaas ayaa laguugu sharixi doonaa tilaaboyinka kale oo dhan.

## Xafiiska Shaqada ee Gobolka

Xafiiska shaqada ee gobolka (RAV) wuxuu kugu caawinayaa si deg deg ah inaad shaqo kale ku hesho. Hadii aad qaadato lacagaha kaalmada shaqo la'aanta waxaa waajib kugu ah inaad tagto Ballamaha talada ay kula yeeshaan RAV-ka. Sidoo kale RAV-ka waxuu bixiyaa koorsooyin ama shaqooyin aad kusii tababaran karto. Ka qeyb qaadashada barnaamijyada RAV-ka kuu diro qaarkood waa waajib. Sidoo kale dadka aan waligood ka shaqeynin Swiiserlaan ee shaqo raadiska ah waxay iska qori karaan RAV-ka laakin wax lacag kaalmo ah mahelayaan.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/soziale-sicherheit/arbeitslosigkeit

# Xanuunada iyo Shilalka

Qofkastoo ku nool Swiserlaan waa inoo ku jiraa Ceymiska xanuunada iyo shilalka. Shirkadaha Ceymisyada gaarka loo leeyahay ayaa dusha saaranayo kharashaadka ku baxo, shilalka, xanuunnada iyo Uurka. Labadaan Ceymis waa waajib inaad gasho saddexda bilood gudahood imaanshaha Swiserlaan kadib.

## Ceymiska Xanuunada (Grundversicherung)

Dhammaan dadka ku dhaqan wadanka Swiserlaan waxay ku qasban yihiin inay Inaftooda u sameystaan Ceymiska Xanuunada ee waajibka ah (Grundversicherung). Qofkii soo dago Swiserlaan waxuu haystaa muddo 3 bilood ah oo ku sameysto Ceymiska. Hadii uu mudadaas dhexdeeda xanuunsado, kharashaadki ku baxay waxaa dib ugu celin Ceymiska uu geli doono. Ceymiska waajibka ah waxaa laga sameysan karaa Shirkadaha Ceymiska gaarka loo leeyahay ee bixiya Xanuunada (Krankenkassen). Kala doorashada Shirkadahaas waxaad u tahay xor. Shirkadaha Ceymiska xanuunanada waxaa ah inay qaabilaan dhammaan dadka ku dhaqan wadankan Swiserlaan.
Dadka ku jira Ceymiskan waxay dhiibaan bil walbo Lacag. Lacagaha la dhiibo cadadkooda waxay uka sareeyaan hadba shirkada Ceymiska ee aad ku biirtay ama nooca ceymiska gaarka ee aad dalbanayso sidaas awgeed ayay u fiicantahay in isbarbardhig lasameeyo inta aan la sameysan kahor. Sanadwalbo dhammaadka bisha Nofeembar ayaad shirkada caymiska ku badalan kartaa shirkad kale. Ceymiska Caafimadka qasabka ah ma bixiyo kaliya kharashaadka ku baxo marka qof xanuunsado ee waxay bixiyaan sidoo kale kharashaadka hooyada uurka leh iyo dhalitaanka. Waxyaabaha ay bixinyaan Ceymisku waxaa jiro Xeerar sharciyaysan oo u dagsan.
Fiiro Gaar ah: Kharashaadka ku baxo daaweynta ilkaha ama ookiyaalaha indhaha caadi ahaan qofkasto isaga ayaa iska bixinaayo ama hadii uu ku jiro Ceymiska Xanuunada ee dheeraadka ah oo aan qasabka ahayn.

## Ceymiska Shilalka

Shaqaalaha si toos ah ayay ugu jiraan Ceymiska shilalka dhaco saacadaha shaqada iyo fasaxa haddii ay shaqeeyaan in kabadan 8 saacadood usbuucii. Qofkii 8 saacadood kayar shaqeeyo waa inuu goonidiisa u galaa ceymiskaas. Dad gaarka u shaqeysto ee ganacsatada ah iyo dhamaan dadka aanan shaqeyna sidoo kale. Dadka aanan shaqeynin waa inay Shirkadooda Ceymiska Xanuunada (Krankenkasse) ka galaan Ceymiska Shilalka. Dadka gaarka u shaqaysta sidoo kale iyagana waxay iska diiwaangelin karaan Shirkadaha kale ee Ceymiska Shilalka bixiyo. Dadka ku jiro Caymiskan waa inay bil walbo bixiyaan lacagaha Ceymiska. Dhammaan dadka shaqeeyo waxaa bil walba si toos ah looga gooyaa lacagaha Ceymiska shilalka mushaharkooda.

## Qiimo dhimista kharashaadka Ceymiskan

Qof waliba oo aanan awoodin inuu iska bixiyo kharashaadka Ceymiska xanuunada waxuu xaq uleeyahay caadiyan in laga bixiy Ceymiska waajibka ah ee xanuunada (Prämienverbilligung). Si lagaaga bixiyo kharashaadkan waa inaad buuxisaa warqaha lagu dalbanayo adigoo cadeynaayo kharashaadka kusoo galo iyo hantidaada. Hadii la aqbalo dalabkaada waxa lagaa bixinaa kharashadkii laga bilaabo bishaas. Hay'adda Kaalmada Bulshada (Amt für Sozialbeiträge) ayaa kusiin doonto macluumad kusaabsan (Prämienverbilligung) codsigaagana kaa qaban doonto.

## Ceymiska Caafimadka dheeraadka ah

Si xor ah ayuu qof walbo u sameysan karaa Ceymiska Xanuunada waajibka ah kuwo ka dheeri ah (Zusatzversicherungen). Faa'idada ay bixiyaan waa inay bixiyaan kharashaadka aysan bixin midka waajibka ah. Tusaale ahaan, daaweynta ilkaha. Ceymiska dheeriga ah waxaa laga sameysan karaa inta badan dhammaan Shirkadaha ceymiska xanuunada bixiyo. Shirkadaha iyagaa xor u ah in qaabilaan qofka inuu sameysto ceymiska dheeriga iyo inkale amaba waxay dul dhigi karaan shuruudo.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/soziale-sicherheit/krankheit-und-unfall

# Waalidiinta iyo Qoyska

Swiserlaan Qofkii haysto Caruur waxaa laga caawiyaa kharashaadka ilmaha iyo waxbarashadooda. Haweenka shaqeeya marka ay dhalaan waxay xaq u leeyihiin ugu yaraan 14 usbuuc oo fasax ah musharkooduna usocdo.

## Taakulaynta Hooyada

Haweenka shaqeeya marka ay dhalaan waxay xaq u leeyihiin inta badan ugu yaraan 14 usbuuc oo fasax ah musharkooduna usocdo (Mutterschaftsurlaub). Mudadan inta lagu jiro waxay helayaan boqolkiiba 80 mushaharkii ay ku shaqeyn jireen. Haweenka aan shaqeynin ama aan awoodin inay shaqeeyaan waxaa la gudboon inay la xiriiraan Hay'adda ururisa dhaqaalaha Ceymiska bulshada si ay u ogaadaan inay xaq u leeyihiin iyo inkale. Waxaa jiro sharciyo gaar ah oo lagu ilaaliyo hooyoyinka, 8-da usbuuc ee ugu horeysa marka ay dhalaan kadib looma ogola inay shaqeeyaan (Mutterschutz)

## Fasaxa Aabaha

Aabeyaalka waxay xaq u leeyihiin marka ilmhahooda dhashaan kadib 2 usbuuc fasax ah oo mushaharkooduna usocdo (Vaterschaftsurlaub). Marka la isku eego Fasaxa hooyada iyo aabaha: Aabaha fasaxiisu waxuu u qaadan karaa hal mar ama maalmo kala gooni ah. Waxaase qasab ah inuu qaato fasaxiisa oo dhan 6 bilood gudahood dhalashada ilmahisa kadib.

## Kaalmada Qoyska

Qofkii haysta ilmo waxaa lagu caawiyaa dhaqaale (Familienzulagen). Ilmaha lagu caawiyo qoyska waa kuwa ka yar da'da 16 sano halka dhalinyarada ku jirto waxbarashada ee ka yar 25 sano lagu caawiyo kaalmada waxbarashada. Waxaa intaanba xaq uleh waalidiinta shaqeeya (sidoo kale kuwa iskood u shaqeysta), ama waalidiinta aanan shaqayn oo aan haysan dhaqaale ku filan. Shaqaalaha waxaa kaalmada qoyska loosoo raaciyaa bilwalba mushaharaadkooda. Xog dheeraad ah oo kusaabsan kaalmada qoyska waxaa kula wadaagayo maamulka meesha aad ka shaqeyso ama Xarunta Ceymiska bulshada. Cadadka Kaalmada qoyska la siiyo wey kukala duwanyihiin gobollada.

## Kaalmada Qoyska ee kirada Guriga

Qoysaska danyarta ah waxay shuruudo kooban kadib dalban karaan kaalmo dhaqaale oo ijaarka guriga lagaga bixinaayo (Familienmietzinsbeiträge). Cadadka dhaqaalahan wuxuu ku xiranyahay inta dakhli iyo hanti ay haystaan dadka guriga kuwada nool iyo qiimaha ijaarka guriga.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/soziale-sicherheit/waalidiinta-iyo-qoyska

# Ceyrta

Ceyrta waxaa lagu caawiyaa dadka aanan haysan lacag kufilan oo ay ku noolaadaan ama waxba ama wax yar oo dhaqaale ah ka hela Ceymiska Bulshada. Ujeedka waa in dadka ay u suuro gasho inay awoodaan inay is bixin karaan. Tani ma ahan Ceymis balse waa caawin ka timid Dowlada.

## Ceyrta

Ceyrta (Sozialhilfe) waxaa lagu caawiyaa dhammaan dadka ku nool Swiserlaan ee xaalad dhaqaalo xumi ku jiro. Waxay dabooshaa kaliya baahida ugu yar ee nolosha. Marka laga soo tago kaalmada dhaqaale sidoo kale waxay bixiyaan talooyin. Ujeedku waa in dadka sida ugu dhaqsaha badan u noqdaan dad dhaqaale ahaan isku filan. Ceyrta lama siiyo marka qof caawinkale oo dhaqaale misna ku filan inuu noloshiisa ku dabero uu helayo - sida tusaale ahaan Kaalmada Shaqo la'aanta, lacagta gunada, mushahar ama caawinaad uu kahelayo ehelkiisa. Sidoo kale Xafiiska Ceyrta ma bixiyaan deymaha. Lacagaha Ceyrta waa in dib loo bixiyaa, marka qofku dib u helo dhaqaale ku filan. Dhaqalaha Ceyrta waxaa maalgeliyo dadka canshuuraha bixiyo.

## Dalbashada Ceyrta

Qofka rabo inuu dalbado Ceyr waa inuu la xiriiro Xafiiska adeega Bulshada (Sozialdienst) ee degmadiisa. Halkaas waa inuu qofka dakhligiisa iyo hantiisa si cad usoo bandhigo. Kadib waxaa lasoo kala cadeynayaa inuu xaq uleeyahay iyo inkale. Dowladu cadadka ay bixinayso iyo nooca caawintu qofka helaayo waxay u dejisaa qofba goonidiis. Qofka wax been ah sheega ama ka aamuso runta waxuu noqonayaa dambiile. Xafiiska Adeega Bulshada waxuu bixin karaa Ammaro ama kugu xiri karaa shuruudo. Hadii aad kasoo bixi weyso waxaa lagaa yareyn karaa dhaqaalihii lagu siinayay. Ka qayb galka ballamaha xafiiskan waa waajib. Waxa qofka waajib kasaaran inuu wax kasta oo ah siduu duruuftan uu ku jiro u yareyn lahaa sameeyo.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/soziale-sicherheit/sozialhilfe